

Xeerka Maamulka 12 Agoosto 1957, lamba. 186 rep.

Dhismaha Guddi Farsamo iyo xubnaha uu ka koobanyahay ee loogu talagalay daraasaadka iyo uruurinta hindisaha xeerka iyo nidaamka, ku saabsan xeer nidaamiyaha Ciidanka Boliiska. Nidaamka iyo maqaamka sharciyeed, ee dhabta ah iyo horumarinta saraakiisha.

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

WASIIRKU

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 “ Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya”;
Marka uu arkay Dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 “Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya”;

Marka uu tixgaliyay baahida deg-degga ee loo qabo in laga hawlgalo qaraarada sharciyeed ee soo socda: “Xeerka Nidaamka Ciidanka Boliiska iyo maqaamka sharciyeed, qoritaanka, horumarinta Saraakiisha” iyo nidaamyada la xariira, haddii loo baahdo;

Marka uu garowsaday in daraasadda iyo uruurinta hindise sharciyeedyada iyo nidaamka arrimaha la soo sheegay uu galaya iqtisaska caadiga ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Diyaarinta qaabaka xeerka iyo nidaamka, lagu soo sheegay ararta waxaa loo xilsaaray “ Guddi farsamo” oo ka kooban:

- Dhamme Giovanni Salvano – Guddoomiye
- Mudane Jaamaca Gaanni Axmed – Xubin
- Dr. Shiv Kumar kashyap – Xubin
- Gaashaanle Pasquale Vove – Xubin
- Mudane Islaw Mahadalle Maxamed Mahadalle – Xubin
- Dhamme Maxamed Abshir – Xoghaye

Qod. 2

Hawlaha waa in lagu soo dhammaystiraa illaa 31 Disember 1957.

Qod. 3

Qaababka waa in loo soo gudbiyaa taariikhda la soo sheegay Wasaaradda Arrimaha Gudaha taasoo marka ay ka baaraandegto u soo diraysa Golaha Wasiirada, kuwaaso ugu yeeri kara in uu ka soo qaybgalo khabiir ahaan Dhamme Giovanni Salvano.

Qod. 4

Xubnaha Guddiga, maalmaha ay shaqada rasmiga ku jiraan waxaa u sugnaatay gunnada ku xusan xeerarka jira.

Muqdisho, 12 Agoosto 1957.

Wasiirka

Xaaji Muuse Boqor

Waa la hubiyay lana diiwaangaliyay – Diw. lamba. 4 – bogga lamba. 144.

Muqdisho, 27 Agoosto 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**